


TAXANAHA DHAXALREEB II/ 2007


Meey 2007 Ponte Visibile Ed.

Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maan- sooyinka Soomaaliyeed



Cabdiraxmaan C. Faarax 'Barwaaqo'

Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawrantahay qoraaga kor ku magacaaban oo lagala xidhiidhi karo hal_aqoon@yahoo.com



Buug elektroonigga waxa daabacay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group.
Meey 2007—daabaciddii 2aad—Pisa

Taxanaha Dhaxalreeb:

- [1] Jama Musse Jama, Juun 2005
Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay.
- [2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.
- [3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.
- [4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?
- [5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.
- [6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed.


Taxanaha Dhaxalreeb waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhawr jeer ka soo baxa degelka redsea-online.com. Waxa isku dubbarida qoraalladaas Lama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisible Ed. Ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

Dhawaanahan dambe waxa si aad ah isu soo taraya kala garasho la'aanta ama kala saarid la'aanta badaha ay ka soo jeedaan maansooyinka Soomaaliyeed. Sidaasi awgeed waxad arkaysaa dad badan oo jiipto gabay ku sheegaya, ama geeraar gabay ku tilmaamaya. Waxan haddaba qoraalkan kooban wax kaga sheegi gefefkaasi iyo sida ay wax uga jiraan. Waxa kale oon tilmaami sida aragtida Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" ee miisaanka maansadu u tahay furaha ugu habboon ee ilaa maanta la hayo ee loo adeegsan karo kala asooridda badaha maansooyinka Soomaaliyeed iyo kala garashada maanso kastaa badda ay ka soojeeddo.

Aan ku bilaabee, intaan dalku burburin, dadka iyo afkuna habaqle noqon, waxan u haystey in la kala yaqaaney badaha maansooyinka Soomaaliyeed oo ay aad u adkayd isku murgintoodu. Waxa kale oo aan filayey in la yaqaan maansakastaa badda ay ku abtirsato. Hase ahaatee, malahaasu wuxu afka u dhacay kolkii aan dhawaan dareemay in dhibaataada maanta jirtaa kaba horreysey burburka. Tusaale ahaan, maansada hoos ku qoran ee uu tiriyey Xuseen Dhiqle ayaa lagu sheegey iney gabay tahay (Aw Jaamac Cumar Ciise 1999).

*Dhurwaa adhiga Eebbaa leh
Eebbiyo Ustaadkaa leh
Oo niman dableyaa leh
Oo niman ku dili baa leh
Waa niman Daraawiisha
Gaaciye Mataan baa leh
Geeraarshihii baa leh
Laba ilma Garaadaa leh
.....*



Haddii aan is nidhaa ha la kala ogaado maansadaasi badda ay tahay, ama badda ay ku abtirsato, laba arrimood mid ahaan baa la yeelikarraa. Ta u horraysa waxan eegikarraa muuqaalka guud. Waxanan maansada barbar dhigikarraa maanso la yaqaan badda ay ka soo jeeddo. Tusaale ahaan haddii aan dhawr tuduc ka soo qaadanno gabaygii Cumar Usteeliyo ee ahaa:

*.....
Adhi waa dhallaan iyo haween dhimiradiisiiye
Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka karameede
Dhaqaalaa haweenkiyo guryaha siima dhaafsana e
Lo'da dhiiqda laga maala iyo dhayda iyo xoorku
Dhudhunkay biyaa kula jirtiyo dharabka weeyaane
Kol hadday abaaruhu dhacaan dhiimatay geesleeye
Ragga laxa sii dhawrayow dhaqasho waa geele!
.....*

Waxad arkaysaa in maansada Xuseen Dhiqle, dhanka muuqaalka, ka gaabantahay ta Cumar Usteeliyo. Kol haddii ay sidaa u kala geddisan yihiinna waxa innoo cad inaanay isku qaab dhismeed ahayn. Sidaasi awgeed lama odhan karo maansada Xuseen Dhiqle waa gabay.

Ta labaadi waa innaga oo adeegsanna Miisaankii Maansada (Maxamed Xaashi Dhammac 'Gaariye' 1976), taasi oo aan si fudud uga arkikarro kala duwanaanshaha labada qaab dhismeed si hawlyarna u garan karro badda ay tahay. Haddii aan haddaba adeegsanno miisaanka waxay u qormayaan sidan hoos ku qeexan:

Adhi waa dhallaan iyo haween dhimiradiisiye¹
1 1 2 (1) 2 1 1 (1) 2 1 1 (1) 2 2 (1) = 20
Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka karameede
1 1 2 (1) 1 1 2 (1) 2 2 (1) 1 1 2 (1) = 20
Dhaqaalaa haweenkiyo guryaha siima dhaafsana e
1 2 2 (1) 2 1 1 (1) 1 1 2 (1) 2 1 1 (1) = 21
Lo'da dhiiqda laga maala iyo dhayda iyo xoorku
1 1 2 (1) 1 1 2 (1) 1 1 2 (1) 1 1 2 (1) = 20
Dhudhunkay biyaa kula jirtiyo dharabka weeyaane
1 1 2 (1) 2 1 1 (1) 1 1 1 1 (1) 2 2 (1) = 20
Kol hadday abaaruhu dhacaan dhimatay geesleeye
1 1 2 (1) 2 1 1 (1) 2 1 1 (1) 2 2 (1) = 20
Ragga laxaha sii dhawrayow dhaqasho waa geele!
1 1 1 1 (1) 2 2 (1) 2 1 1 (1) 2 2 (1) = 20

Ta Xuseen Dhiqlana waxay u qormaysaa sidan hoos ku qoran:

Dhurwaa adhiga Eebbaa leh
1 2 1 1 (1) 2 2 1 = 11
Eebbiyo Ustaadkaa leh
2 1 1 (1) 2 2 1 = 10
Oo niman dableeyaa leh
2 1 1 (1) 2 2 1 = 10
Oo niman ku dili baa leh
2 1 1 (1) 1 1 2 1 = 10

¹Shaqallada labada bilood ku dhexjiraa waa 'xundhuro'. Markuu tuduca gabaygu 20-le yahay xundhur kasta afar shaqal baa ka horma. Kolka uu 21-le yahayse xundhurta u horreysa oo qudha ayey shan shaqal ka hormaraan.

Waa niman Daraawiisha

2 1 1 (1) 2 2 1 = 10

Gaaciye Mataan baa leh

2 1 1 (1) 2 2 1 = 10

Geeraarshihii baa leh

2 2 (1) 2 2 1 = 10

Laba ilma Garaadaa leh

1 1 1 1 (1) 2 2 1 = 10

Halkaa waxan ka garan karraa inaanay maansadaasi ahayn gabay ee ay tahay jiipto sagaalley iyo tobanley oo hal shaqal gadaal laga raaciyey, taasi oo ka dhigtay iney maansadu la qaab dhismeed noqoto heesta caanaha lagu lulo ama ta maqasha dacawada lagaga jiro (Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaariye' 1976). Bal adiguba maansadaa iyo heesahan hoos ku qoran isu foodi:

Naa hooy dayooy hee dheh

2 2 (1) 2 2 1

Dayo Faaraxeey hee dheh

1 1 2 (1) 2 2 1

Faadfaatisooy hee dheh

2 2 (1) 2 2 1

Faadumo Ardooy heedheh

2 1 1 (1) 2 2 1

Waa lay dilaayaaye

2 2 (1) 2 2 1

Waa lay dabaayaaye

2 2 (1) 2 2 1

Hay soo dhowaan dhoosey

2 2 (1) 2 2 1

Heesta caanuhuna waxay ahayd haddii aan idin xasuusiyo:

Haan yahay qabooy qoor yar

2 1 1 (1) 2 2 1

Ma fayobid oo ogiye

1 1 2 (1) 2 1 1 1

Ma furtaa lagaa dhuugey?

1 1 2 (1) 2 2 1

ama ta kale ee tidhaa:

Haantaydu waa gaari

2 2 (1) 2 2 1

Waa gorof an xooleeyey

2 1 1 (1) 2 2 1

Oon geed ka soo goostay

2 2 (1) 2 2 1

Gacalkayna ima siinnin

1 1 2 (1) 1 2 1

Sidaasi oo kale ayaa maansadan hoos ku qoran ee uu tiriyey Ina Cabdalla Xasan loogu sheegay gabay (Aw Jaamac Cumar Ciise 1999). Maansada kolkaad akh-rido waxaad dareemaysaa inaanay gabay ahayn. Bal idinkuba waatane ila eega:

Ma sabaan ka saba an baan,
nabad saafi ahaayoo
Sujuudoo edeb yeeshayoo,
sawd xun aanan lahayn
Ma sabaan ka sabaan baan,
salowgaan kicinaayyo
Saryankaan eryanaayyo,
sakhraankii iska daayey
Ma sabaan ka sabaan baan,
so' yaqaanka dugaaggiyo
Haadkii aannu sabeyney,
soominnoo qadinnayoo
Ma sabaan ka sabaan baan,
safarkaygu xirnaayoo
Suuqyadii Buullaxaar iyo,
Saaxil aanan tegeynoo
Ma sabaan ka sabaan baan,
sabadii Cagaciidiyo
Suubaankii Ballishiil ,
Soobir aanan ku maalin
Ma sabaan ka sabaan baan,

.....

A	GABAYGA JAAD EE XARAFKA «S»
A	MA SABAAN KA SABAAN BAAN ¹⁰

Gumaysiga Ingiriisku wuxuu wax badan ku dadaalay inay Dar hehaha nabadeed dhiigtaan. Arrintaasuna waxay keentay in vaash layo dhaafado, si waaweyn nabadeed loo hato. Daraawishta w kasta la ahaayd in arrintaasi aanay sina u suurtoagal ahayn in w nabadeed la helo. Iyada oo gumaysiga Ingiriiska ka gurii Soomaaliya mooyaane iyo inuu bihiyo wax afafale waa dad iy. Daraawishta gaarey ee uu maagga iyo gandarada uga dhacay g Ingiriiska.

Gayaal badan haddii arrintaasi socotay guul iyo go'aan aan m gaarin, oo wehba calaalee iyo qur'aadana uu gumaysiga Ingiri waxyey. markaas uu dagaal lagama maarmaan noqday, ayaa Dar col qataalweey. Sayid Muammad oo colki Daraawishta guul ama guuta-bihinaya, oo xusaminaya ama u timaamaya waa li waka ku maqan. Iyo waxa ay faldoonaan, isla markaana ogeyi ergo. afqobadee iyo af beent inaanay waxda tarayn, oo waxa la g sheegaya waxa la filanayana samasadiinaya ayaa martey maan socota:

Ma sabaan ka sabaan baan, nabad saafi ahaayoo
Sukudoo edeb yeeshayoo, sawd xun aanan lahayn

Ma sabaan ka sabaan baan, salowgaan kicinaayyo
Saryankaan eryanaayyo, sakhraankii iska daayey

Ma sabaan ka sabaan baan, so' yaqaanka dugaaggiyo
Haadkii aannu sabeyney, soominnoo qadinnayoo

Ma sabaan ka sabaan baan, safarkaygu xirnaayoo
Suuqyadii Buullaxaar¹¹ iyo Saaxil¹² aanan tegeynoo

Ma sabaan ka sabaan baan, sabadii Cagaciidiyo¹³
Suubaankii Ballishiil¹⁴, Soobir aanan ku maalin

Ma sabaan ka sabaan baan, sida siggyo cawsha

¹⁰ Gabayga wixaan ka qorey Xaaji Jaamac Ismaaciil Dhoom.
Buullaxaar waa magaclo fi waji oo ku taal wehba u dheeraya Berber Seylac.

¹¹ Saaxil waa magac labaad oo waji fiore Berber la odhan jiray.

¹² Cagaciid waa ceele geeloo loo jaso oo ka mid ah ceeleasha Caymeed.

Haddii aan si wacan ugu fiirsanno maansada oo aan adeegsanno aragtidii miisaanka maansada waxaad dareemaysaa inaanay maansadu gabay ahayn ee ay tahay geeraar. Bal adba tusaalahan geeraarka ah iyo maansada isu foodi:

Saaxirkii kala guuray

2 1* 2 1 1 2* 1 1

Sarreeyow ma nusqaamow

1 2* 2 1 1 2* 2

Aan siduuyahay eego e

2 1* 2 1 1 2* 1 1

Kaana siib kanna saar

2 1* 2 1 1 2*

Ma sabaan ka sabaan baan,

1 1* 2 1 1 2* 2

nabad saafi ahaayoo

1 1 * 2 1 1 2* 2

Intaas oo qudha maaha. Bogga 191aad, ee daabacaaddii 2aad, ee buugga Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdalla Xasan, labada maanso ee ku yaal, oo geeraar ah, baa ayana lagu sheegay inay gabay yihiin. Waxa haddaba isweydiin leh, haddii Aw Jaamac Cumar Ciise iyo raggii hawsha la wadey ay maansooyinkaasi gabay ku sheegeen maxaad u malayn qof caadiya oon suugaanba wax ka aqoon?

Gefafka jaadkaasi ihi ma yara. Dhawrka tuduc ee hoos ku qoran oo ku jirey heestii *Diiriye Baalbaal* baa iyana la sheegay inaanay tiskaad noqon (Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' 2004).


.....

Kol mushaax

Kol mafsuum

Kol mashxarad

.....



Sidii maansooyinkii hore haddii aan ku adeegsanno aragtida Gaarriye ee miisaanka maansada si hawl yar baan u ogaankarraa badda ay tuducyadaasi ka

tirsanyihiin. Intaynaan, haddaba, sheegin badda ay ka soo jeedaan bal aan marka hore eegno qaab dhismeedkooda oo u qorno sida hoos ku qeexan:

Kol mushaax

1 1 2

Kol mafsuud

1 1 2

Kol mashxarad

1 1 1 1

Kolkii aan sidaa u qorray maxaa inooga dhuroobey? Waxa halkaa innooga soo baxay inuu tuduc kastaa ka koobanyahay afar (4) shaqal. Taasi oo inna xasuusineysa qaab dhismeedkii heesta la qaado kolka hadhuudhka lagu tumayo mooyaha ee la laba tiboodinayo. Heestaasi oo tidhaa:

Mooyaha

2 1 1

Malab laha

1 1 1 1

Magacii

1 1 2

Mooyaan

2 2

Tibahana

1 1 1 1

Culusiyo

1 1 1 1

Cabban baa

1 1 2

La yidhaa

1 1 2

Hadal gun buu leeyehee, waxa halkaasi innooga caddaatay in aragtida Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaariye' ee Miisaanka Maansadu aanay inna barayn sida loo maansoodo oo qudha² ee aan si hawlyar ugu kala ogaan karro jaadadka badaha maansooyinka Soomaaliyeed.

Maanso kasta oo qalabka la tumo lagu garaacaa waa hees. Hayeeshee, midhaha heestu waa jaad ka mid ah badaha maansooyinka ee kala duwan. Waxase jirta inaan dadku sidaa u kala aqoon. Tusaale ahaan, weli ma lays weydiiyey

²Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaariye' wuxu qoraalkiisii Miisaanka maansada ku bilaabay: Maqal! Ma jeciaan lahayd inaad gabaydo? Mase ogtahay inaan abwaanimada loo dhalan uun ee la samayn karo?

heesta la yidhaa *Suleekha* ee uu *tiriye* *Maxamed Ibraahin Warsame 'Hadraawi'* badda ay ka soo jeeddo? Waxan hubaa inaan weli weydiintaasi lays weydiin. Arrintu siday doontaba ha ahaatee, bal aan heestaa ku nasanno oo eegno badda ay ka soo jeeddo. Haddii aan idhaa heestu waxay ka kooban tahay laba badood oo isku dhafan dad baa yaabi. Runtuse waxay tahay inay heestaasi ka kooban tahay laba badood. Qaybta hore oo ka soojeedda badda loo yaqaan *Baarcaddaha* iyo qaybta labaad oo ka soo jeedda badda *Geeraarka*. Si aan arrintaa u caddeeyo waxan adeegsanayaa aragtidii miisaanka maansada ee Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaariye' sida hoos ku qeexan:

Idaa subag laga lulaa

(1) 2 1 1 1 1 (1) 2

Lo' baa saan laga baxshaa

(1) 2 2 1 1 (1) 2

ge(e)l baa sidig loo ogaa

(1) 2 1 1 2 (1) 2

sengaan orod lala ekayn

(1) 2 1 1 1 1 (1) 2

sareedo Ilaahay baa leh

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1

hablaa Soomaaliyeedna

(1) 2 2 2 (1) 2 1

haddaan quruxdooda saanyo

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1

haddaan miisaanka saaro

(1) 2 2 2 (1) 2 1

sagaal tobankii adaa leh.

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1

Qaab dhismeedkaasi bal aan u foodinno kii heesta baarcaddaha ee tidhaa:

Hiyeeleeeley hiyee

(1) 2 2 2 (1) 2

Habluhu gaaggaabanaa

(1) 1 1 2 2 (1) 2

Ma galabbay wada dhasheen

(1) 1 1 2 1 1 (1) 2

Ma gudin baa lagu sarjaray
(1) 1 1 2 1 1 (1) 1 1

Hadal iyo dhammaantii, miyaanay labadaa qaab-dhismeed isku mid ahayn?

Sidaasi oo kale haddii aan qaybta dambana ku adeegsanno aragtidii miisaanka maansada waxa innoo soobaxaya inay geeraar tahay. Tusaale ahaan:

Suleekhaay araggaagu

1 2 * 2 1 1 2* 1

nafta waw samirsiiso

1 1 * 2 1 1 2 * 1

saddex bay ku qaddaaye.

1 1 * 2 1 1 2 * 1

ha ka goynin salaanta

1 1 * 2 1 1 2 * 1

Sansaankaagiyo jaaha

1 2 * 2 1 1 2 * 1

sarajoogiyo tooska

1 1* 2 1 1 2 * 1

dhexda soohane tooxda

1 1 * 2 1 1 2 * 1

sayn fardoodda ka dhuuban

2 1 * 2 1 1 2 * 1

biixiyaa isa saaran

2 1* 2 1 1 2* 1

garaaraa kala soocay,

1 2 * 2 1 1 2* 1

sanqaroorka la dhiibshaa

1 1 * 2 1 1 2 * 2

nafta aan sasabaayo

1 1* 2 1 1 2* 1

somal haad gelinaaya.

1 1 * 2 1 1 2* 1

.....

Geeraarkina waa kane bal adiguba barbardhig:

Saaxirkii kala guuray

2 1* 2 1 1 2* 1 1

Sarreeyow ma nusqaamow

1 2* 2 1 1 2* 2

Aan siduuyahay eego e
 2 1* 2 1 1 2* 1 1
 Kaana siib kanna saar
 2 1* 2 1 1 2*

Heesta kale ee la yidhaa *wacdaraha adduunka* ee Hadraawi tiryey baa iyana ka kooban laba badood. Qaybta hore oo ah Baarcadde (eeg bogga 9^{aad}) tusaale ahaan:

Walaac anigoo ku seexday
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
maxaan walbahaar la toosay
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
wareer anigoo la liita
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
maxaan werwer jiifi waayey.
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
Maxaan sida weer cadhaysan
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
saqaa dhexe gaaf-wareegey,
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
intuu waqal ii hillaacay
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
maxaan kula rooray weelka,
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
u baydhay wadiiqo leexsan
 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1
wakhtigu i tilmaami waayey.
Jacaylku muxuu i wiiqay

muxuu wadnahayga shiilay

Maxaan shimbiraa waraystay
u dhiibey waraaq daboolan
haaddii wacdigayga qaadday
cid weeye tidhaahda weydey.

Iyo qaybta labaad oo ah hooriskii heesta oo ka soo jeedda badda ay heesta maqasha lagu kaxeeyaa ku fadhido. Tusaale ahaan:

Waayeel dadow
 2 2 (1) 2

inan waalanahay
1 1 2 (1) 1 1
duni weer siddoo
1 1 2 (1) 2
weligeed dhintoo
1 2 (1) 2
wacadkiyo xadhkii
1 1 1 1 (1) 2
weydaarataan
2 2 (1) 2
weetaynayaa.
2 2 (1) 2
.....

Heesta kale ee la yidhaa *hambabber* ee isla Abwaankaasi curiyey waxay ku fadhidaa badda *Maroodi maroodi*. Heesta *Sirta ereyga* la yidhaa kuna bilaa-banta:

Saaxiibkayow heedhe,
2 2 (1) 2 2 1

iyana waa badda heesta haanta lagu lulo ee tidhaa:

Haantii qabooy qoor yar.
2 2 (1) 2 2 1

Haddii aan maansooyinka Gaarriye wax ka soo qaadanno, ta la yidhaa Bi'iwaa warlaay bal aan eegno:

Weyl yahay baxsane
2 1 1 (1) 1 1
Bixisadu waddaa
1 1 1 1 (1) 2
Bi'iwaa Warlaay
1 1 2 (1) 2
Adoon laacdan baran
1 2 2 (1) 1 1
Oon weli bislaan
2 1 1 (1) 2
Ha baraashishiyin!
1 1 2 (1) 1 1
.....

Kolkii aan adeegsannay aragtidii miisaanka maansada miyaanay la qaab ahayn heestii aan soo sheegnay ee tidha:

Maqaleey warlaay
1 1 2 (1) 2
Ma lagu warramay
1 1 2 (1) 1 1
In Cali la diley
1 1 1 1 (1) 2
Oo Cumar la dilay
2 1 1 (1) 1 1
Uu dhiig qulqulay
2 2 (1) 1 1

Heesihii lixdanaadkii bal aan ayana wax ka fiirinno. Heestan hoos ku qoran waxa tiriyey Axmed Ismaaciil “Cagaf” (Eebbe haw naxariistee). Waxaanay tidhaa:

Waa mahad Allee
2 1 1 (1) 2
Maantaba dunida
2 1 1 (1) 1 1
Ka mid baynu nee
1 1 2 (1) 2

Iyada qudheedu miyaanay la qaab dhismeed ahayn tii maqasha?

Kolkanna bal maanso kale oo la yidhaa Han-laawe aan eegno (Cabdiraxmaan Faraax ‘Barwaaqo’). Han-laawe waxay tidhaa:

.....
Intii hanqal taagtee
1 2 1 1 2 2
Hilaaca arkootee
1 2 1 1 2 2
Hollaand u tallowday
1 2 1 1 2 1
Hadday garan laydba
1 2 1 1 2 1
Iney hawirmeyso
1 2 1 1 2 1
.....

Hadal waa murtiye, miyaanay la qaab dhismeed ahayn badda heesta maroodi maroodi ee hoos ku qoran:

Maroodi maroodi
1 2 1 1 2 1

Maroodi cadhoole
1 2 1 1 2 1
Haddii col la sheego
1 2 1 1 2 1
Cadaadda ku meere
1 2 1 1 2 1
Hashii Cosob waa tan
1 2 1 1 2 1

Ugu dambayntii, qoraalkan oo ku saabsanaa kala garasha la'aanta ka jirta badaha ay maansooyinka Soomaaliyeed ka soojeedaan, waxan tilmaamay in dhibaataadu jirtay intaan dalku burburin. Waxa kale oon si shilis u tilmaamay in aragtida Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaariye' ee miisaanka maansadu tahay furaha keliya ee, ilaa maantadan maanta ah, la hayo ee loo adeegsan karo kala asooridda iyo kala garashada badaha ay maansooyinku ka soo jeedaan. Waxa kale oo tilmaan gaaban ka bixiyey sida heesaha cusub ee la dhegeysto qudhoodu uga soo jeedaan badahaasi, waxa keliya ee soo kordhayna yahay qalabka lagu tumayo.

Raadraac

Aw Jaamac Cumar Ciise. 1999. *Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Daabacaadda 2aad, Neyroobi.*

Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale'. 2004. *Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, Abokers Förlag, Sweden.*

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'. 2006. *Kumaa ah aabbaha miisaanka maansada Soomaaliyeed? Ma Carraale mise Gaariye? Dhaxalreeb No.4. Pisa, Italy, Ponte Invisible Ed.*

---. 2007. *Han-laawe. Hal-aqoon xidhmada II, tirsiga 1,2: 9-12.*

Maxamed Ibraahim Warsama 'Hadraawi'. 1993. *Hal-Karaan Maansadii Maxamed Ibraahim Warsama (Hadraawi) 1970-1990.* Kleppe, Norway: Den Norske Somalia-komiteen.

Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaariye'. 1976a. *Miisaanka maansada.* In *Xiddigta Oktoobar*, 17 January, 1976: 3.

---1976b. *Miisaanka maansada.* In *Xiddigta Oktoobar*, 24 March, 1976: 3.

---. 1976c. *Miisaanka maansada.* In *Xiddigta Oktoobar*, 27 March, 1976: 3.